# suuxintaada loogu talagalay Qalliinka wadnaha

Buug-yarahaan waxa uu ku siinayaa macluumaad ku saabsan suuxdintaad qalliinka wadnaha ee dadka waaweyn (wadnaha) iyo waxa aad filan karto ka hor, inta lagu guda jiro iyo ka dib qalliinka.

Waa inaad akhrido buug-yarahan oo ay la socoto warqadaha buuk-**yarahaada iyo suuxintaada** labaduba oo laga heli karo iyagoo ku qoran luqado kala duwan halkan: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages, iyo wax walba macluumaad kale ee uu bixiyo Isbitaalkaagu.

## Nuxurka

Buug-yarahaan waxa uu sharaxayaa:

- Sida la isugu diyaariyo qalliinka wadnaha
- Maxaa dhacaya qalliinka kahor
- Maxaa dhacaya maalinta qaliinka
- Maxaa dhacaya qalliinka kadib
- sida loogala hadlo dhakhtarkaaga suuxdinta khataraha iyo ikhtiyaarada
- halka laga helo macluumaad dheeraad ah.

## Isu diyaarinta qalliinka

Bukaannada firfircoon ee awood u leh inay sare u qaadaan heerarkooda caafimaad iyo dhaqdhaqaaq waxay si dhakhso ah uga soo kabtaan qalliinka waliba si dhib yari ah.

Waxaa jira wax badan oo aad samayn karto si aad isugu diyaariso qalliin. Xitaa isbeddellada yaryar waxay sameyn karaan farqi weyn. Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad kordhiso heerarkaaga dhaqdhaqaaqa jidhka oo aad hagaajiso cuntadaada. Haddii aad cabto ama aad sigaar cabto, waa inaad ka fikirtaa inaad iska jarto ama aad joojiso.

Haddii aad qabto dhibaato caafimaad oo soo jireen ah, kala tasho dhakhtarkaaga haddii ay jiraan wax aad samayn karto si aad u hagaajisid qalliinka ka hor.

Adeeggeenna **Si fiican iyo si deg-deg ah uga bogsashada qallinka** waxay ku siin doonaan macluumaadka aad u baahan tahay si aad u noqoto mid caafimaad qaba oo si fiican ugu diyaar garoobo qalliinkiisa. Fadlan ka eeg webseydkeena nuqul ka mid ah buug-yaraha oo laga helo iyagoo ku qoran luqado kala duwan halkan: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages

## Sidee baa la ii qiimayn doonaa qalliinka ka hor?

Isbitaalada intooda badani waxay leeyihiin rugta qiimaynta qalliinka ka hor (qiimaynta kilinigada). Qolkani waxay kaa caawin doontaa inaad u diyaar garowdo qalliinka wadnahaaga waxayna kuu diyaarin doontaa baaritaan kasta oo loo baahan yahay dhiiggaaga, wadnahaaga, sambabadaada iyo kelyahaaga. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad timaado wax ka badan hal ballan.

dhakhtarka suuxinta ama kalkaalisada qalliinka kahor waxay rabi doontaa inay wax ka ogaato caafimaadkaaga guud iyo heerarka dhaqdhaqaaqaaga. Waxay ku weydiin doonaan su'aalo ku saabsan daawooyinka aad qaadato, wixii xasaasiyad ah ee aad qabtid, dhibaatooyinka wadnahaaga iyo suuxdinta oo laga yaabo inaad hore u lahayd. Waa fikrad wanaagsan in aad soo qaadato liiska dhammaan daawooyinka aad sida caadiga ah u qaadato (waxaad ka heli kartaa koobiga liiskan farmashiistahaaga ama GP-gaaga).

Waxay sidoo kale ku weydiin doonaan wax ku saabsan ilkahaaga, taajajka ama ilkahaaga, iyo haddii aad wax dhibaato ah kala kulanto inaad afka kala qaado ama dhaqdhaqaajiso qoortaada.

Kalkaalisada ama takhtarka suuxinta ayaa ku ogeysiin doona sida saxda ah marka aad u baahan tahay inaad joojiso cunista iyo cabbitaanka ka hor qaliinka. Caadiyan, waxaad awoodi doontaa inaad wax cunto ilaa lix saacadood oo aad cabto biyo ilaa laba saacadood ka hor qaliinka, ama wax ka yar xaaladaha qaarkood.

Takhtarka suuxinta ama kalkaalisada ayaa ku siin doona tilmaamo ku saabsan daawooyinka ay tahay inaad qaadato maalinta qalliinka. Kuwaas waxa lagu qaadan karaa kabasho biyo ah isla markaaba wakhtiga qalitaanka haddii lagama maarmaan tahay.

Rugta qiimaynta qalliinka ka hor, waxaad heli doontaa fursad aad ku waydiiso su'aalo kasta oo aad ka hadasho wixii walaac ah ee aad ka qabto qalliinka iyo suuxdinta.

# Halista iyo go'aan gaarista la isla wadaago

## Suuxinta casriga ah aad bay badbaado u tahay. Waxaa jira qaar ka mid ah waxyeelooyinka caadiga ah ee ka yimaada daawooyinka suuxdinta, ama qalabka loo isticmaalo inta lagu jiro qalliinka wadnaha, kuwaas oo aan badana ahayn kuwo halis ah ama aan sii waarin. Khatarta ayaa sidoo kale ku kala duwanaan doonta shaqsiyaadka.

Dhakhtarkaaga suuxinta ayaa kaala hadli doona halistu ay rumeysan yihiin inay aad kuugu muhiimsan yihiin. Waxay ka hadli doonaan oo kaliya khataraha aan caadiga ahayn haddii ay khuseeyaan xaaladdaada. Haddii aad rabto inaad akhrido faahfaahin badan oo ku saabsan khataraha la xidhiidha daawooyinka suuxinta, fadlan ka eeg webseydkeena macluumaadka laga helo iyagoo ku qoran luuqado kala duwan halkan: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages

## Go'aan gaaris leysla wadaago

Go'aan gaarista leysla wadaago waxay hubisaa in shakhsiyaadka la taageero si ay u gaaraan go'aamo iyaga ku habboon. Waa hab wada shaqeyneed oo uu takhtarku ku taageero bukanka si uu go'aan oga gaadho daawaynta.

Wada sheekeysigu wuu isku keenaa:

- khibrada dhakhtarka, sida fursadaha daawaynta, caddaynta, halista iyo defooyinka
- waxa uu bukaanku si fiican u garanayo: dokhooda, durufahooda gaarka ah, yolalka, dhaqankooda iyo waxa ay aaminsan yihiin.

Wax badan ka ogow: www.england.nhs.uk/personalisedcare/shared-decision-making

Waa kuwan qaar ka mid ah qalabyada aad isticmaali karto si aad sida ugu fiican uga faa'iidaysato wada-hadalladaada aad la yeelato dakhtarkaa suuxinta ama qiimaynta qalliinka ka hor:

### Doorashada qaab dhismeedka BUUNSHA caqli galka ah UK

U isticmaal tan xasuusin ahaan si aad u weydiiso su'aalo ku saabsan daweynta.
https://bit.ly/CWUK_leaflet

### waydii waxda caafimaadka ee NHS seddex su'aalood

Waxay siindoontaa xolashooyin badan oo ku saabsan daryeelkaga caafimaad.
https://bit.ly/NHS_A3Qs

### The Centre for Perioperative Care (CPOC)

CPOC waxay soo saartay filmanta boombalaha ah si ay kuugu sharaxdo waxa ay tahay go'aan qaadashada la isla wadaago.
www.cpoc.org.uk/shared-decision-making

# Su'aalaha aad jeclaan laheyd in aad weydiiso

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan suuxintaada, qor (waxaad isticmaali kartaa tuusalooyinka hoose kadibna ku darso su’aalahaahga meesha bannaan ee ayaga ka hoose). Qaliinka wadnaha waxaad caadi ahaan la kulmi doontaa suuxdin ka hor maalinta qalliinka. Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa kooxda qiimaynta qalliinka ka hor, kuwaas oo laga yaabo inay awoodaan inay kuu habeeyaan inaad talefoonka kula hadasho takhtarka suuxinta ama aad ku aragto rugta caafimaadka.

**1. Ma leeyahay khataro gaar ah oo iga yimaada suuxdinta?**

**2. Ilaa intee ayay ka soo kabashadaydu qaadanaysaa?**

**3. Ilaa intee ayaan ku sii jirayaa HDU (cutubka ku tiirsanaanta sare) ama ICU (qaybta daryeelka degdega ah)?**

**4. Goorma ayaan awoodi doona inaan aado guriga?**

**5.**

**6.**

## Maxaa dhacaya wakhtiga qalliinka dhabta ah?

Takhtarka suuxinta ee ku ilaalin doona ayaa ku soo booqan doona isbitaalka ka hor qaliinka. Isbitaalada qaar, takhtarka suuxinta ayaa laga yaabaa inuu ku siiyo daawada suuxinta kahor suuxintaada si ay kaaga caawiso inaad nasato.

Qaliinka ka hor, waxaa lagu weydiin doonaa inaad xirato dharka qolka qalliinka. Kalkaalisadaadu waxay kugu dhejin doontaa jijin si ay kugu xaqiijiso aqoonsigaaga iyo, haddii loo baahdo, wixii xasaasiyad ah. Qalliinnada qaarkood, waxaad xidhi doontaa sharabaadyo cadaadis ah si ay kaaga caawiyaan inaad xinjiro dhiig ku yeelato lugahaaga.

Markaad timaaddo goobta qalliinka, kaaliyaha suuxinta ayaa kula kulmi doona oo hubin doona dhammaan faahfaahintaada. Kadib waxay kugu xidhi doonaan mashiino badan (kormeerayaal). Kuwaas waxaa ka mid ah mishiinka ECG (electrocardiogram) (si loola socdo garaaca wadnahaaga), mashiinka dhiig karka iyo fiilada farta ama dhegta si loo cabbiro heerarka ogsijiinta ee dhiiggaaga. Waxaa laga yaabaa in qaar ka mid ah istiikarada lagu dhejiyo foolkaaga si loo cabbiro sida qotada dheer ee aad u huruddo muddada suuxintaada iyo heerka ogsijiinta maskaxdaada.

Waxaad yeelan doontaa laba ama saddex tuubooyin (tuubooyinka balaastikada ah ama 'faleembo') oo la geliyo xididadaada iyo halbowlahaaga, inta badana gacanta ama cududda. suuxinta goob yar oo jirka ka mid ah ayaa kabuubin doonta maqaarkaaga si aysan u dhaawacmin wax ka badan baaritaanka dhiigga caadiga ah. Inta lagu jiro wakhtigan, waxa laga yaabaa in lagu siiyo suuxdin si ay kuu nasiso iyo ogsijiin dheeraad ah oo aad neefsato Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku

saabsan suuxinta, fadlan eeg xaashida Sedation-ka ee lagu sharraxay oo halkan ku qoran:[www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages](www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages)

## Maxaa dhacaya inta uu qaliinka socdo?

Daawooyinka suuxinta ayaa si tartiib ah loogu durayaa mid ka mid ah dhibcaha gacantaada. Marka gebi ahaan lagu suuxiyo, takhtarka suuxinta ayaa afkaaga gelin doona tuubo neefsashada. Mashiinka loo yaqaan hawo-mareenka ayaa markaas ku afuufi doona ogsijiinta sanbabadaada, iyo sidoo kale gaaska suuxinta si uu kuu suuxiyo.

Sidoo kale, ka dib marka lagu suuxiyo, tuubo jilicsan (kateetarka) ayaa lagu xiri doonaa kaadiheystaada si ay u muujiso inta ay le'eg tahay kaadida kelyahaagu sameeyaan. Marka la suuxiyo waxay sidoo kale gelin doonaan mashiinta tuubada codka ee lugu ogaado uur ku jirta (oo loogu talagalay echocardiogram transoesophageal ama TOE) afkaaga hoos xagga caloosha si ay u siiyaan sawirada wadnahaaga inta lagu jiro qaliinka. Tan waxa laga soo saarayaa ka hor intaadan toosin. Halista dhaawaca hungurigaaga (tuubada cuntada) ee ka timaada tuubada mashiinka codka ee lugu ogaado uur ku jirta ee TOE waa naadir - in ka yar 1 kiis 2,000 kiiba.

tuubada daawada jirka siisa mid ka weyn ayaa qoorta lagaa gelinayaa ka dib marka lagu suuxiyo (ku seexo daawada suuxinta). Tan waxa loo isticmaalaa in lagu siiyo daawooyin gaar ah waxayna kaa caawin doontaa inaad sheegto sida wanaagsan ee wadnahaagu u bamgareynayo. Tan waxaa badanaa la sameeyaa markaad seexato. Haddi dhakhtarka suuxinta u maleeyo inay jirto baahi loo qabo in la geliyo ka hor inta aan lagu suuxin (iyadoo la isticmaalayo suuxinta goob yar oo jirka ka mid ah si uu maqaarka u kabuubiyo), waxay kaala hadli doonaan arrintaas.

Qalliinno badan oo wadnaha ah, qalliin suurtagal maaha haddii wadnuhu garaacayo. Haddii ay tani tahay kiiska qalliinkaaga, kooxdaadu waxay kugu xidhi doontaa bam gaar ah oo loo yaqaan mashiinka shaqada wadnaha qabta si kumeel gaar ah (wadnaha-sanbabada). Mashiinkaani wuxuu la wareegayaa shaqada wadnaha wuxuuna ku shubaa dhiiga hareeraha jirkaaga. Waxa kale oo ay ku daraa ogsijiinta dhiiggaaga. Tani waxay la macno tahay in kooxdu ay si badqab leh u joojin karaan garaaca wadnahaaga qayb ka mid ah qalliinka. Qalliino badan oo wadnaha ah ayaa ka socda inta u dhaxaysa saddex ilaa shan saacadood. Dhaktarkaaga suuxinta farsamayaqaanka ilaalinaya mashiinka shaqada wadnaha qabta si kumeel gaar ah ayaa si dhow kuu ilaalin doona inta lagu jiro waqtigan.

Waa caadi inaad lumiso xoogaa dhiig ah inta lagu jiro qalliinka wadnaha. Kooxdaadu waxay ku duri doonaan dareere marinka tuubada daawada jirka siisa si ay u beddelaan dhiig kasta oo lumay. Haddii ay suurtagal tahay, waxay ururin doonaan dhiiggaaga iyagoo isticmaalaya mashiin gaar ah (unug-badbaadiyaha) oo ay dib kuugu soo shubaan. Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inaad u baahato dhiig lagu shubo inta lagu jiro ama ka dib qaliinka. Dhiiga loo isticmaalo ku shubista si taxadar leh ayaa loo eegaa, dhiiga casriga ah ee dhiiga lagu shubana aad buu u badbaado badan yahay. Kuma siin doonaan dhiig ka badan inta aad u baahan tahay si aad u bogsato badbaadadaada. Waxa kale oo laga yaabaa inaad u baahato qaybo kale oo dhiiga ah, sida balasma cusub oo barafaysan ama platelets.

Takhtarkaaga suuxinta ayaa waxaas oo dhan kaala hadli doona waxaana laga yaabaa inuu ku weydiiyo inaad saxiixdo foom oggolaansho oo gaar ah.

## Maxaa dhacaya qaliinka kadib?

Qalitaanka ka dib, waxa lagu geynayaa qaybta daryeelka gaarka ah (ICU) ama qeybta ku tiirsanaanta sare (HDU). Tani waa sababta oo ah waxaad u baahan doontaa daryeel caafimaad oo heer sare ah iyo qalab gaar ah oo aan lagu siin karin qaybta caadiga ah.

Inta aad ku jirtid ICU ama HDU, garaaca wadnahaaga, cadaadiska dhiigga, neefsashada, iyo shaqada kelyaha ayaa si dhow loola socon doonaa. Kalkaalisadaadu waxay isku hagaajin doontaa dareeraha iyo daawadu si waafaqsan waxaad u baahan tahay.

Waxay ku suuxin doonaan oo ay ku xidhi doonaan hawo-mareenka ilaa ay ka gaadhayso wakhtiga saxda ah ee lagaaga keeni karo suuxinta gabi ahaanba.

Kooxda ICU ayaa markaa ka saari doona tuubadaada neefsashada waxayna ku siin doonaan ogsijiin iyaga oo maaskaro saaraya afkaaga iyo sankaaga. Tani waxay badanaa dhacdaa afar ilaa lix saacadood ka dib dhammaadka qalliinka. Waxay noqon kartaa mid ka danbeysa tan (xitaa maalmo) xaalado adag ama haddii aad qabto dhibaatooyin neefsasho. Dhakhtarka qalliinka iyo takhtarka suuxinta ayaa tan kaala hadli doona qalliinka ka hor haddii ay u maleynayaan in neefsashadaadu u baahan doonto taageero dheeraad ah qalliinka ka dib.

Markaad soo kacdo, wali waxa lagu xidhi doonaa dhammaan dhibicyada iyo kormeerayaasha. Waxa kale oo aad yeelan doontaa hal ama laba tuubbo oo ka soo saara wixii dareere ah ee laabtaada. Waxaa laga yaabaa inay jiraan fiilooyin fiican oo ku dheggan wadnahaaga (filliyada pacing) kuwaas oo takhtarkaaga suuxinta uu isticmaali karo, haddii loo baahdo, si uu u xakameeyo garaaca wadnahaaga. Kuwaas waxaa badanaa lagu hayaa dhowr maalmood. Waxa kale oo laga yaabaa inaad weli haysato kateetarka kaadiheystaada si uu kaaga caawiyo inaad kaadido.

Inta lagu jiro iyo ka dib qalliinkaaga, dhakhtarka suuxintaada ayaa ku siin doona dawooyin xanuun baabi'iye xoog leh iyadoo loo marayo dhibicda si ay kuugu dabacsanaato. Marka ay ka soo saaraan xuubabka laabtaada, waxa aad yaraan doontaa inaad u baahato xanuun baabi'iyeyaal xooggan oo waxaad awoodi doontaa inaad kaniini afka ka qaadato.

Kalkaalisadaadu waxay si joogto ah u hubin doontaa heerarka xanuunkaaga. Waa muhiim inaad qaadato xanuun baabi'in kugu filan si aad u awoodo inaad si qoto dheer u neefsato oo aad si fiican u qufacdo. Waa muhiim inaad qufacdo xab-xab si ay sambabadaada si fiican u shaqeeyaan oo ay uga hortagaan infakshanka xabadka.Takhtarka jimicsiga jirka ayaa kuu sharxi doona jimicsiga neefsashada oo ku tusi doona sida saxda ah ee loo qufaco. Takhtarka jimicsiga jirka ayaa kuu sharxi doona jimicsiga neefsashada oo ku tusi doona sida saxda ah ee loo qufaco.

Waa lagu soo booqan karaa intaad ku jirto qybta ICU ama HDU. Kalkaaliyahaaga kaala talinaayo waqtiyada booqashada iyo tirada booqdayaasha la oggol yahay.

Sababtoo ah waxaa laga yaabaa in lagugu xanaaneeyo meel ay ku jiraan bukaano aad u xanuunsan, waxaana laga yaabaa inaysan ku habboonayn carruurta yaryar inay soo booqdaan.

Waxa laguu wareejin doonaa qaybta marka aanad u baahnayn dhammaan la socodka iyo daawaynta daryeelka degdega ah. Tani waxay badanaa noqon doontaa laba ama saddex maalmood ka dib qaliinka.

Waxaad kala hadli kartaa dhakhtarkaaga qaliinka inta ay filayaan in soo kabashadaadu qaadan doonto iyo goorta aad awoodid inaad ku noqoto gurigaaga.

Ka soo kabashada qalliinka wadnaha ayaa noqon kara mid aad u adag marka loo eego noocyada kale ee qalliinka. Iyadoo ku xiran kiiskaaga gaarka ah, waxaa laga yaabaa inaad u baahato xoogaa daaweyn dheeraad ah. Kuwaninwaa tusaalayaal.

- Sambabbadaadu waxa ay u baahan karaan in lagaa caawiyo hawo-qaadista muddo ka badan inta caadiga ah waxaana inta badan lagu suuxin doonaa wakhtigan. Tani aad bay caadi u tahay - ku dhawaad 10kii kiisba 1.
- Haddii aad u baahan tahay inaad ku jirto mashiinka neefsashada wax ka badan dhawr maalmood, tubadda neefsashada ee afkaaga waxay u baahan doontaa in loo beddelo 'tracheostomy'. Kani waa tuubo si toos ah ugu sii socota dhinaca hore ee qoortaada una sii socota marinka hawadaada. Tani waa wax caadi ah - 1 ka mid ah 100 kii kiisas. Tuubada tracheostomy si fudud ayaa loo soo saari karaa marka aan loo baahnayn
- Waa caadi in dhiig-bax gudaha ah uu yimaado qalliinka ka dib takhaatiirtaada iyo kalkaaliyayaashaadu si taxadar leh ayay ula socon doonaan. Haddii dhiigbaxu xad dhaaf yahay, Dhakhtarka suuxinta iyo takhtarka qalliinka ayaa laga yaabaa inay go'aansadaan inay dib kuugu celiyaan qolka-qalliinka si loogu sameeyo qalliin dheeraad ah oo lagu joojinayo dhiigga. Tani waa qayb ka mid ah sababta lagu suuxinayo dhawr saacadood ka dib marka qalliinku dhammaado.
- saddex ka mid ah tobankii qof ee lagu sameeyo qalliinka wadnaha waxay yeelan doonaan waxoogaa aan caadi ahayn oo ah garaaca wadnaha inta ay ka soo kabanayaan. Fiilooyinka ku-meel-gaadhka ah ee xawliga ah ayaa badanaa ku dhejiya dhakhtarkaaga qalliinka inta lagu jiro qaliinka si uu u caawiyo wadnahaaga si caadi ah haddii loo baahdo. Tiro yar oo bukaanno ah ayaa u baahan qalab-qaade joogto ah qalliinka ka dib.
- kelyahaagu mararka qaarkood waxay u baahan yihiin caawinaad dheeraad ah si ay si sax ah u shaqeeyaan waxaana laga yaabaa in mashiinka sifaynta lagu nadiifiyo dhiiggaaga qashinka inta ay kelyahaagu soo kabanayaan. Tani waa caadi - qiyaastii 1 kiis 50kii. Dhakhtarka suuxinta ayaa u baahan doona inuu ku shubo faleebo kale oo weyn mid ka mid ah xididdadaada haddii aad tan u baahan tahay.
- Wadnahaagu waxa laga yaabaa inuu u baahdo caawimo si uu si fiican dhiigga ugu shubo inta uu ka soo kabanayo. Tani waa caadi - qiyaastii 1 kiis 100kii. Inta badan takhtarka suuxinta ayaa ku siin doona daawooyin si aad tan u sameyso, laakiin marmarka qaarkood bambooyin macmal ah ayaa la isticmaalaa ilaa uu wadnuhu mar kale iskiis u shaqeeyo

Kooxdaada qalliinka ayaa kaala hadli doona halista hababkan  qalliinka ka hor haddii ay u malaynayaan inaad u baahan tahay.

## Ku soo kabashada qaybta iyo aadida guriga

Marka kooxda ku daryeeleysa ICU ama HDU ay ku qancaan inaad si dhammeystiran u bogsato, waxaad ku noqon doontaa qeybta qalliinka.

Muddada aad ku qaadanayso ICU ama HDU iyo goorta aad gurigaaga aadi karto waxay ku xidhan tahay nooca qalliinka ee lagugu sameeyay, wixii dhib ah ee ka dhasha qalliinka, iyo dhibaatooyinka caafimaad ee kale ee laga yaabo inaad qabto.

Isbitaalada qaar ayaa bixiya barnaamijyo baxnaanin ah sida soo kabasho la xoojiyay. Waxaad wax badan oo arrintan ku saabsan ka heli kartaa shabakadda NHS: www.nhs.uk/conditions/enhanced-recovery

Ma awoodi doontid inaad baabuur wadid qalliinka ka dib, markaa waa inaad diyaarisaa taksi ama qof ku qaado. Isbitaaladu waxay caadiyan u baahan yihiin in qof wayn uu kuu yimaado marka lagaa saaro, xataa haddii aad tagsi guriga u raacdo.

Kahor inta aan lagaa saarin waxaa lagu siin doonaa macluumaad ku saabsan jimicsi kasta oo aad sameyneyso si ay kaaga caawiyaan ka soo kabashadaada iyo macluumaadka ku saabsan sida loo daryeelo dhaawacaaga.

Waa inaad la xiriirtaa Dhakhtarka guud-kada ama cisbitaalka lagugu qalay haddii:

- aad qabto xanuun daran ama xanuunkaagu uu kordho
- aad ku yeelato xanuun iyo barar meesha lagaa qalay
- waxa kaa soo baxaya dheecaan nabarka
- laftaada naaska waxay dareemeysaa inay dhaqaaqeyso
- aad dareento xanuun laabta ah ama neefsashada oo kugu adkaata
- Haddii aad qabto wax welwel ah oo aan lagu sheegin faahfaahinta bixinta, fadlan nala soo socodsii in isbitaalka ku siiyay.

## Halkee ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Isbitaallada intooda badani waxay soo saaraan waraaqo macluumaad ah oo iyaga u gaar ah oo ku saabsan qalliinka wadnaha qaar badan oo ka mid ahna waxay ka kooban yihiin macluumaad ku saabsan suuxinta.

Waraaqahaasi waxa kale oo laga yaabaa in laga helo waaxda suuxinta ama rugta qiimaynta hore ee cusbitaalkaaga.

Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan qalliinka wadnaha iyo dhibaatooyinka suurtagalka ah waxaa laga heli karaa webseydyada bulshada ee Qalliinka Wadnaha (SCTS) iyo British Heart Foundation (BHF):

- Bukaanada (www.scts.org/patients)

- Daaweynta xaaladaha wadnaha iyo wareegga dhiigga: (www.bhf.org.uk/informationsupport/treatments).

Afeefasho

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buug-yarahaan keligiis looma tixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix (www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. tTayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

# Noo sheeg sida aay kula tahay

Haddii aad hayso wax talooyin ah, fadlan imaylka ku soo dir: patientinformation@rcoa.ac.uk

**Kulliyadda Royal ee Dhakhaatiirta Suuxinta**
Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG
020 7092 1500

## www.rcoa.ac.uk

**daabacaadda saddexaad, Sebteembar 2023**
Buug yarahan waxaa dib u eegis lagu samayn doonaa saddex sano gudahood laga bilaabo taariikhda la daabacay.

**© 2023 Kulliyadda Royal ee Dhakhaatiirta Suuxinta**
Xaashidan waxa laga yaabaa in laso koobiyeeyo si loo soo saaro agabka macluumaadka bukaanka. Fadlan tixraac ishan asalka ah. Haddii aad rabto inaad qayb ka mid ah buug-yarahaan ku isticmaasho daabacaad kale, waa in la bixiyaa qirasho ku habboon oo laga saaro calaamadaha, sumadaha, sawirada iyo astaamaha. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan nala soo xiriir.